



TAAGEERADA MACMIILKA



CAYMIS HEL. CAYMIS KU SII JIR.

Xaashida Xaqiiqda

wahealthplanfinder.org

1-855-WAFINDER

1-855-923-4633

MA U BAAHAN TAHAY CAAWIMAAD AMA SU'AALO MA QABTAA?

Waxaa jira ikhtiyaaro taageero kala duwan oo aad ku heli karto caawinaadda aad u baahan tahay si aad isugu qorto caymis caafimaad.

Ikhtiyaarada Taageerada Macmiilka

Iskaa-u-adeegashada Macmiilka

Agab iyo talooyin cillad-bixin ayaa laga heli karaa wahbexchange.org, *mareegtada taageerada* ee Washington Healthplanfinder. Halkan ayaad sidoo kale waxaad ku arki kartaa foomamka xaqiijinta, su'aalaha inta badan la isweydiyo, xaashiyada xaqiiqda iyo macluumaadka kale oo muhiimka u ah joogteynta caymiskaaga.

Dallaalada

Dallaaliin shati haysta oo ka diiwaangashan *Washington Healthplanfinder* ayaa la heli karaa si ay gacan uga siiyaan shakhsiyada iyo shaqaalaha in ay helaan qorshaha caymiska ee saxda ah. Dallaaliinta waa khubarro aqoon durugsan u leh oo ku siin kara talooyinka iyo macluumaadka qorshaha.

Hagayaal

Hagaha waa wakiil tababaran oo la aqoonsan yahay oo kugu caawin kara in aad iska diiwaangeliso caymis loo maraya *Washington Healthplanfinder*. Hagayaashu waa in ay ahaadaan kuwo aan dhanna u eexan, iyo haddii ay awoodaan in ay kula dulmaraan geeddi-socodka isqoritaanka, waxaa laga yaabaa in aysan kugu dhiirrigelin qorshe caafimaad oo gaar ah.

Xarunta Taageerada Macmiilka

Washington Healthplanfinder's Xarunta Taageerada Macmiilka ayaa la heli karaa Isiniin - Jimco (iyo maalmaha fasaxa ee toddobaadka qaarkood, inta lagu guda jiro muddada isqoritaanka furan) si ay kaaga caawiso su'aalaha, cillad-bixin codsiga, iyo kuwo kaloo badan. Xarunta Taageerada Macmiilka waxaa laga heli karaa 1-855-WAFINDER (1-855-923-4633).

Sida loo Helo Caawimaad Qof Ahaan ah

Washington Healthplanfinder waxay leedahay dhammaan ikhtiyaarada taageerada macmiilka si ay uga jawaabto su'aalaha ku saabsan cidda isku qori karta, caawimaadda maaliyadeed ee la heli karo, sida loo dukaameysto oo la isku barbardhigo qorshayaasha, iyo kuwo kaloo badan.

Waxaad caawimaaddan heli kartaa iyada oo loo marayo qalabka baarista Taageerada Macmiilka *Washington Healthplanfinder* iyo *app-ka* WAPlanfinder.

Waa Sidan Sida Taageerada Macmiilka ay Kuu Caawin Karto

- Sharaxidda qofka isku qori kara, isqoritaanka, iyo xeerarka barnaamijka
- Kaa caawinta in aad fahamto dheefaha iyo kharashaadka qorshe caafimaad kasta
- Ilaalinta sirtaada iyo asturnaantaada
- Suuragelinta helidda adeegyada dhaqanka, luuqadda, iyo naafonimada

Haddii aad rabto su'aalo dheeraad ah, fadlan wac 1-855-WAFINDER (1-855-923-4633) ama iimayl noogu soo dir customersupport@wahbexchange.org